

Maanta iyo Shucuurta Reer Somaliland

Contributed by Ibrahim Sacad
Tuesday, 16 January 2007

Mar kale oo aan milicsaday indhahaygana soo-jiitay hal-ku-dhig ahaa (16 sano oo deganaansho ah & Ictiraaf la'aan haysata Somaliland

Maanta iyo Shucuurta Reer Somaliland

Arooryadii Hore ee maanta oo ahayd Salaasa ayaa Bulshada reer Somaliland meel kasto oo ay Dunida dacaladeeda ka joogaan, maanta oo ay taariikhdu ahayd 16/01/2007 waxa ay ku muujiyeen rabitaankooda iyo sida ay uga soo horjeedaan is-dar dambe oo ay la midoobaan K/Somaliya.

Isku-soo-baxan oo ay soo Agaasimeen Saddexda Xisbi Qaran ee UDUB, KULMIYE & UCID, iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha JSL, ujeeddadiisuna ahayd Xaqa ay Bulshada Reer Somaliland u leeyihiin Aqoonsi dhab ah oo ay ka helaan Bulshada Caalamka.

Haddaynu ku horayno Caasimada Dalka ee Hargeysa waxa isukgu soo baxaya dad tiradoodu kor u dhaaftay 60,000 oo qof , socod ku maray Badhtamha Magaalada. kuwaas oo ka soo bilaabay lixda degmo ee Caasimdu ka kooban tahay, ku waas oo sitay boodhada ay ku xardhan yihiin hal-ku-dhigyo ka turjumaya (Jiritaanka Qaranimada Somaliland & Xamar doonimayno No-Somalia).

Banaa-baxaas oo ay ka soo qayb-galeen Golaha Xukuumada, Xubnaha Labda Gole, Saddexda Xisbi Qaran iyo bulshada Rayidka ah.

Ugu horayn waxa bulshada fagaaraas Beerta Xorriyada kala hadlay Madaxweyne ku-xigeenak JSL, Mudane Axmed Yuusuf Yaasii oo aad ugu dheeraaday rabitaanka ummada iyo ka tashiga aayahooda islamarkaana dadaka ula hadlaayay si xamaasadaysan, waxa isna haddalka qaatay Guddoomiyaha Xisbiga Siyaasiga ah ee UCID Eng Faysal Cali Waraabe oo dadka ku baraarujiyay u diyaar garawga Difaaca Dalka iyo ka hortaga khatar kasta oo soo-waajahda Dalka, Sido kale waxa isna hadalka qaatay ku-simaha Guddoomiyaha Xisbiga KULMIYE Mudane Maxamuud Saalax Nuur (Fagadhe) oo aad u baraarujiyay Dadka.

Mar kale oo aan milicsaday indhahaygana soo-jiitay hal-ku-dhig ahaa (16 sano oo deganaansho ah & Ictiraaf la'aan haysata Somaliland

Guntii iyo Geba-gebadii waxa Munaasibadaa Taariikhiga ah soo xidhay Xaajiga Dalka Xaaji Cabdi Xuseen oo ka tirsan Mudanayaasha Golaha Guurtidda JSL dadkii goobtaas ku sugnaana uga sheekeeyay sidii ay ku yimid Calanka Maanta laydhiisa la hadhsaaanyo.

Mudahaaraadkaasina waxa uu ku dhammaaday si nabad-gelya ah.

Wariye

Farsamda

Ibraahim Sacad Muuse

Mohamed Ali Kahin

Hargeysa

Hargesia

Dhallinyaro Banaanbaxa ka soo qaybgashay

16 sano oo nabad iyo ladnaan ah ayay Somaliland jirtay

kumanaan qof oo isugu soo baxay Beerta Xorriyadda